Cheryl Miller: Mar labaad, qof kastaa, ha ku soo dhawaado warbaahinta dhanka maqalka ah ‘podcast’ ee OHCC Connections. Waad ku mahadsan tahay in aad maanta nagu soo biirto. Waxaan ahay Cheryl Miller, agaasimaha sare ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon. Tani waa Qaybtii 3-aad ee taxanaheena shan qaybood ah oo ku saabsan shuruudaha tababarka ee cusub ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Waxaa aniga maanta mar kale igu soo biiray hawl-wadaagayaasheena ka socda Tababarka Carewell SEIU 503, Sarah iyo Whitney. Fadlan dadka isbar.

Sarah Edwards: Waan salaamay, qof kasta. Waxaan ahay Sarah Edwards, waxaanan ahay agaasimaha Tababarka Carewell SEIU 503.

Whitney Taylor: Ana waxaan ahay Whitney Taylor, maamulaha horumarinta manhajka ee Tababarka Carewell. Waa farxad in aanu halkan joogno. Waad ku mahad tihiin in aad na martiqaadaan.

Cheryl Miller: Qaybteenii koowaad, waxaanu kaga hadalnay shuruudaha tababarka iyo halka uu ka yimid. Wada hadalkeenii labaad, waxaan kaga wada hadalnay waxa ay shuruudaha cusubi ula egyihiin shaqaalaha cusub. Maanta, waxaanu wax yar si qoto dheer u gudda galeynaa waxay shuruudahan cusubi ula egyihiin shaqaalaha cusub. Tani waxaa loogu talagalay dadka hadda u shaqeynaya shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed ama shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed ahaan. Sarah, miyaad ka hadashid nimaadka fikir ee loo maray abuurista tababarka loogu talagalay shaqaalaha xirfadda leh.

Sarah Edwards: Waa hubaal. Waanu aqoonsanahay in xubno badan oo ka mid ah xoogan shaqaale ee shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed ay kaalintan ka soo shaqeynayeen sanado badan, waxayna ururSadeen aqoon iyo waayo-aragnimo dhaafsiisan wax kasta oo tababar ah oo aan waligeen isku keeni karno. Laakiin ogaanshaha taasi iyo u baahnaanta in loo hoggaansamo mawduucyada waxaa lagu tilmaamay Sharciga Senate-ka 1534, waxaan ka shaqeynay in la isku keeno tababar ku celceliya macluumaadka aasaasiga ah qaarkood ee ay dhici karto in aysan dadka ka fikirin waqti dheer isla markaana bixiya taageero ku saabsan arrimaha adag qaarkood, oo iyaga siiya fursad ay dad kale kula wadaagaan waxay hore u yaqaaneen.

Cheryl Miller: Waa ku mahadsad tahay in taasi dadka la wadaagto. Waa in ay adkayd in la abuuro tababar loogu talagalay shaqaale kala duwan oo leh waayo-aragnimo badan oo kale duwan. Ma xasuusin kartaa qof kasta waxa mawduucyada tababarka ee lagu tilmaamay Sharciga Senate-ka 1534 ay yihiin?

Sarah Edwards: Dabcan, Waxay yihiin tallaabooyinka dhanka ammaanka iyo xaaladda degdega ah, fahamka shuruudaha loogu talagalay daryeel bixiyayaasha dhaqaalahooda lagu bixiyay lacagta Medicaid, bixinta adeegyada qofka ku saleysan, fahamka sida loo taageero baahiyaha jireed iyo dareen ee dadka hela adeegyo iyo

taageerooyin, maareynta daawooyinka, iyo bixinta daryeelka shakhsi ahaaneed iyo ka caawinta hawlaha nolol maalmeedka la xiriira.

Cheryl Miller: Mahadsanid. Whitney, ma noo sheegi kartaa sida shuruudaha ay u khuseyn doonaan shaqaalaha hadda jira ee isla hadaba u adeegaya dadka kale ee waaweyn iyo dadka qaba naafanimada ee dhammaan da'aha kale duwan ee ku nool Oregon, oo ma bixin kartaa guudmarka tababarka?

Whitney Taylor: Waa hubaal, Markaa, shaqaalaha hadda jiraa waa in ay dhammeystiraan dib u eegista taxanaha tababar muddo aan ka dambeyn Maarso 31-keeda, 2022. Dib u eegista taxanaha tababarku wuxuu ka kooban yahay laba qaybood. Qaybta koowaad waa tababar dhanka internet-ka oo sideed saacadood ah oo qofka waqtigiisa ku xiran 'self-paced'. Maya, koorsooyinka dhanka internet-ku waa kuwo sheeko ahaan loo sheegayo waxayna ka kooban yihiin nidaam isku xiran sida riix oo deji, isbarbardhiga iyo su'aalaha hubinta aqoonta si uu kaaga dhigo in aad ku lug yeelato inta hawshu socoto. Arrin kale oo muhiim ah oo ku saabsan koorsooyinka dhanka internet-ka waa in ay ku kala duwan yihiin dherer ahaan. Qaar ayaa gaaban yihiin oo ah sida 15 daqiiqo mana aha in aad dhinac u dhigato waqti aad u badan. Waxaad kaliya ka shaqeyn kartaa tababarka waxoogaa yar hadba mar. Waxaanu jawaab celin badan ka helaynaa daryeel bixiyayaasha isla hadaba dhammeystiray tababarka ee jecel dabacsanaanta koorsooyinka dhanka internet-ka sababta oo ah waxay sameyn karaan tababarka mar kasta oo ay si fiican ugu shaqeynayso iyaga, xataa haddii taasi tahay, oo aad garaynayso, 6:00 subaxnimo ama 11:00 habeenimo.

Cheryl Miller: Haa. Shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed waxay yeelan karaan jadwalado aad u mashquul ah markaa waan arki karaa sida ay u ogaadeen in dabacsanaanta tababarku tahay mid waxtar leh.

Whitney Taylor: Qaybta labaad ee tababarka, aqoon isweydaarsiga dib u eegistu, waa 4½-saac, oo ah ah nidaam isku xiran oo dhanka internet-ka oo toos ah. Aqoon isweydaarsiga dhanka internet-ka ah 'webinar' wuxuu diiradda saarayaa xirfadaha dhanka wada xiriirka iyo siyaabo aad si wax ku oolka ah ula xiriiri karto macaamiisha iyo dhisida faham la wadaago. Daryeel bixiyayaasha ayaa noo sheegay in ay runtii xiiseeyaan tababarkani, gaar ahaan sababta oo ah wuxuu siiyaa fursad ay wax kaga maqlaan daryeel bixiyayaasha kale oo midba midka kale ku dhaafsado fikrado.

Cheryl Miller: Waan arki karaa sida shaqaaluhu uga mahad celiniyaan taasi. Sarah, ma jiraa wax kale oo ku saabsan shuruud dhici karto in ay ka duwan tahay wixii dadku hore u sameyn jireen?

Sarah Edwards: Haa. Dhab ahaantii, wax kale oo ka duwani waa in shuruudani ay aqoonsan tahay in dhammaan daryeel bixiyayaashu ka faa'iideysan doonaan una baahan doonaan in ay qaataan tababarkani, waxaana ka mid ah xubnaha ka tirsan qoyska ee bixiya daryeel loogu talagalay qof ay isku dhow yihiin. Waan fahamsanahay in xubno badan oo ka tirsan qoysku ay runtii daryeelka soo bixinayeen waqti dheer oo

leeyihiin khibrad hodan ah. Waxaanu rabnaa sharafno khibradaasi iyada oo la xaqiijinayo in la taageero.

Whitney Taylor: Waan ognahay in tani ay isbeddel weyn u tahay daryeel bixiyayaasha qoyska waxaanan arkaynaa jawaab celinta koorsada halkaasi oo dadka daryeela xubin ka tirsan qoyska xusaan, sida ay ula yaaban yihiin in ay ogaadaan in tababarku runtii yahay mid waxtar leh.

Sarah Edwards: Haa. Waxaana jira siyaabo badan oo bixinta daryeelka loogu talagalay xubnaha ka tirsan qoysku uu runtii yahay mid adag, iyada oo marka dadka aadaan tababar iyaga oo leh maskac furan, waxay inta badan ogaadaan in haysashada waxyaabo dheeraad ah uu runtii noqon karo mid waxtar leh.

Cheryl Miller: Wow, taasi runtii mid wanaagsan in aanu maqalno in aad helayso noocaasi jawaab celin. Waa caadi. Beddelaada wax yar la beddelayo sida wax loo qabto, waxaan hubaa in shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed ay isla hadaba qaateen tababarka qaarkood. Miyaa tababarada lagu xisaabinayaa dhanka shuruudaha?

Sarah Edwards: Shaqaalaha ka qayb qaata dib u eegista taxanaha tababar iyada oo qayb ka ah barnaamijka tijaabada ah waxay heli doonaan credit-ka dhanka tababarka ah marka ay shuruudaha tababarku dhaqan galaan. Shaqaalaha shahaado helay iyaga oo adeegsanaya Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon waa laga dhaafay shuruudaha tababarka cusub ilaa iyo inta ay sii wadaan buuxinta shuruudaha looga baahan tahay shahaadadaasi. Shahaadooyinkaasi waa shahaadada aqoonsi ee horumarinta xirfadeed (PDC), aqoonsiga daryeelka guriga ama shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed ee la xoojiyay, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed ee gaarka ah, ku tiirsanaanta daryeelka neefsashada ee dhaawaca laf-dhabarta ‘quadriplegia’ VDQ marka la heli karo, iyo shaqaalaha caafimaadka dhaqan ahaaneed.

Whitney Taylor: Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan horumarinta shaqo iyo shahaadooyinka ayaa laga heli karaa website-ka aanu ku xiri doono meesha la sii gelayo ‘link’ ee ku jirta qoraalada showga. Si kastaba ha ahaatee, waxaan rabaa in aan xuso in shaqaalaha hadda jira ay heli doonaan lacagta lagu helo tababarka ‘stipend’ oo loogu talagalay mid kasta oo ka mid ah saddexda qaybood ee tababarka la adeegsanayo Tababarka Carewell. Inta lagu jiro ra’yi ururinta koorsada ka dib, waxaa la weydiin doonaa sida ay jeclaan lahaayeen in loogu soo diro lacagta lagu helo tababarka ‘stipend’, ha ahaato dhijital ahaan ama kaar dhab ah. Ogaantaa, kaliya hal sabab oo dheeraad ah oo aad hore ugu socoto una qaadato tababarka.

Cheryl Miller: Su’aal kale oo aan garanayo oo wareegaysa halkaasi waa, miyay jiri doontaa qiimeyn ama imtixaano miyayna shaqaalaha iyo shaqo-bixiyayaashu awoodi doonaan in ay arkaan natiijooyinka?

Whitney Taylor: Waxaa jirta hubinta aqoonta oo ah mid kasta oo ka mid ah koorsooyinka daryeel bixiyayaasha si uga caawiyaan in ay naftooda qiimeeyaan oo

fahmaan macluumaadka laga hadlay. Haddii ay dareemaan in aysan wax fahmin, waxay ku noqon karaan oo dib u fiirsan karaan boggaggaasi ama mar labaad ha sameeyaan hawlahaasi. Qaybta labaad ee su'aashaada, jawaabtu waa maya, hubinta aqoonta kaliya waxaa loogu talagalay daryeel bixiyayaasha si guudna looma wadaagi doono.

Cheryl Miller: Waan hubaa in taasi ay shaqaalaha ka dhigi doonto in ay wanaag dareemaan. Ka dib marka ay dadku qaataan dib u eegista taxanaha tababar, ma intaasi ayay ku egtahay?

Sarah Edwards: Waxaa jira wax kale oo la xirira shuruuda tababarka, taasina waa sii wadashada waxbarashada. Sidii aanu ku xusnay Qaybtii 1, laga bilaabo 2023 shaqaalaha oo dhan waxaa looga baahnaan doonaa in ay dhammeystiraan 12 saacadood oo ah sii wadashada waxbarashada 24 bilood ee kasta. Waxaan hadda ku gudda ku jirnaa hawsha dejinta koorsooyinkaasi, waxaanan waxyaabo dheeraad ah dadka kula wadaagi doonaa qaybteena xigta.

Cheryl Miller: Waa hagaag, tani waa meel wanaagsan oo lagu joojiyo wada hadalkani. Whitney, dadka raba in ay horay u socdaan oo ay bilaabaan dib u eegista taxanaha tababar, halkee bay iskaga diiwaan gelin karaan taasi?

Whitney Taylor: Waxay booqan karaan carewellseiu503.org/training/current-workers si ay bilaabaan iyada oo had iyo jeerna, aanu bixin doono meesha la sii gelayo 'link' oo ku jirta qoraalada showga si ay dadka ugu sahlanaato dadku in ay taasi helaan.

Cheryl Miller: Waanu ognahay in tani tahay macluumaad badan in la qaato. Waxaanu haynaa dhammaan faahfaahinta la heli karo ama website-yada iyo meelo la sii gelayo 'links' kuwani iyo ilo kale oo waxtar leh oo laga helo karo qoraalada showga. Waan u mahad celinaynaa qof kasta oo qaatay waqti uu ugu soo biiro wada hadalkeena la adeegsanayo warbaahinta dhanka maqalka ah 'podcast'. Waxaanu rajeynaynaa in aanu macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sii wadashada waxbarashada kugula wadaagno qaybteena xigta.